Dhambaalkan waxaa lagu soo dhigay Ingiriis, Ruush, Shiinees La fududeeyey, Soomaali, Isbaanish iyo Fiitnaam shabakadda:https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Seteembar 25, 2020

Ku socoto: Shaqaalaha ODDS iyo Daneeyayaasha
Ka socoto: Lilia Teninty, Agaasime, Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Koboceed
Mawduuca: Maareynta Kiiska iyo Bixiyaha Shaqada Inta lagu jiro Dabka Kaynta

Dhowrkii toddobaad ee la soo dhaafay waxaanu la nimid caqabado oo aanan ku qiyaasi karin inay macquul yihiiny. Intuu dabkii kaymaha ku sii fidayey Oregon, unugyada maareynta kiiska, bixiyeyaasha iyo shaqaaluhu waxay si dhakhso leh uga shaqeeyeen inay ka caawiyaan dadka inay baxaan, iyo sidoo kale inay hubiyaan shakhsiyaadka iyo qoysaska adeegyada.

Waxan doonayaa inaan idinla qeybsado keliya dhawr tusaale oo dadaal ah la sameeyey si dadka loo badbaadiyo inta lagu jiro xaaladdan degdegga ah.

- Ka socota Independence NW: “INW waxay haysay isugeyn ku dhow 800 xiriir macaamil oo joogay Degmada Clackamas. Shaqaalaheennu waxay kormeerayeen khariidadaha dabka duurjoogta ah waxayna la socdeen xaaladda macaamiisha qaab cinwaanada guryaha ah, iyagoo u digaya Wakiilo Shakhsiyeed marka Heer is beddelo sidaa darteed hubin cusub ayaa dhici doonta. Dad badan ma aysan haysan ogeysiisyo degdeg ah oo u shidan taleefannadooda shaqaalaheennuna si dhakhso leh ayey u shaqeeyeen si ay u sharxaan sida ogeysiisyada degdegga ah ay u shaqeeyeen, iyaga oo ku taageeray marin u helidda khariidadaha iyo waxyaabaha ku jira internetka, isla markaana ka caawiyey iyaga abuuritaanka qorshooyinka daad-gureynta iyo badbaadada.”
- Ka socota Wakiil Shaqsiyeed jooga goobta Degmada Clackamas: “Waxaanu haysanay dadaalka koox wanaagsan oo la jirey qoys ku waayey gurigooda. Aabbaha, macaamilka, Shaqaalaha Taakuleynra Shakhsiga ah iyo aniguba si wadajir ayaanu u shaqeynay. Waxaan awooday inaan isku xiro oo u socday Snow Cap iyo Xarunta Addeega Clackamas oo loogu talogalay cunada

degdegga ah, hagaajinta iyo gaarsiinta cunto baakadeysan oo xaaladda hadda ay ku nool yihiin tahay hudheel gudihii."

- Ka socota Ashland Supportive Housing: "Dhammaan guryahanagu waxay ku yaalliin xaafad u udhow dabka Alameda. Shaqaalaheenu waxay dadka uga saareen guryahooda 15 daqiiqadood iyagoo wata wax walba ay u baahan yihiin waqtiga dheer ay ka maqan yihiin guriga iyo kahor intaan amarka rasmiga ee 'tag' ah la soo saarin. Waxay uga soo tegayeen sababo la xiriira waxay arkayeen qiiqa iyo holaca. Shaqaalihii ayaa soo xirxirtay oo raray ka dibna ila socodsiiya. Keilya sidii loo soo tababaray. Waxay dhammaan u joogeen si deggan oo xirfadeysan - xitaa kuwii aan garaneen waxa ka dhacay guryahooda."
- Isuduwaha Adeegga oo jooga Degmada Multnomah oo ku tabarucay inuu caawiyo dadkii soo qaxay ee joogay Convention Center. "Maanta waxay aheyd sida maalin xusuus weyn mudan oo kale oo ku saabsan siday muhiim u tahay in dadka kale loo muujiyo naxariista inta lagu jiro waqtigan. Dadka waxay ka tegayaan guryahoooda oo in badan ku soo jirey COVID-19 iyo dhibaatooyin kale waxay kaloo isku dayayaan inay qabtaan rajo kasta ay u awoodi karaan inay helaan. Anagoo, dhinac kasta oo safarka ku socda markaan safarka ku jirno, waxaan sameyn karnaa isbeddel."
- Children's Intensive In-Home Services (CIIS) oo lala kaashaday wada-hawlgalayaasha bulshada ee gobolka oo dhan. Kooxuhu waxay gacan ka geysteen sameynta qorshooyin keyd ah oo haboon oo loogu talagalay carruurta caafimaad ahaan jilicsan ee u baahnaa inay ka guuraan guryahooda qoyskooda sababo la xiriira dab ka kacay iyo tayada hawada. Carruurtan waxay inta badan isticmaalaan hawo-qaadeyaasha ama qalabka kale ee neef-mareenka waxayna halis sare ugu jiraan COVID-19, sidaa darteed hoyga ku saleysan bulshada mararka qaarkood ma ahayn kuwa ugu habboon. Tusaale ahaan, CIIS waxay la shaqeysay OHSU Doernbecher si ay ugu diyaariso deggenaanshaha hudheellada qoysaska qaarkood.

Waan ogahay inay jiraan boqollaal sheeko oo dheeri ah sida kuwan oo kale, oo ah dadka kor iyo gadaal u socda inay midba midka kale taageeraan. Waa hoos u dhac in la yiraahdo waan ku faraxsanahay nidaamkayaga adeegga. Dhibaato sidan oo kale ah waxay muujineysaa xoogga nidaamkayagu ku dhex leeyahay dadka - Isuduwayaasha Adeegyadayada, Wakiilada Shakhsiyeed, bixiyeyaasha, shaqaalaha iyo dadka I / DD iyo qoysaskooda.

Waxaan kaloo doonayaa inaan kula wadagi qaar ka mid ah Kheyraadka Dabkan Kaymaha oo dadka mararka qaar ay heli karaan caawimaad.

Waanu soo dhweynaynaa wax walba aad sameynayso si aad u dhowrto badbaadad dadka iyo caafimaadkooda inta lagu jiro saddexda xilliyood ee caqabada ah.

Daacadnimo,

Lilia Teninty
Agaasime
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Kobaca (ODDS)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo booqo websaytkayaga.

Waxaad ku heli kartaa dokumintigaan luuqado kale, daabacaad balaaran, qoraalka indhoolaha ama qaabka aad doorbidid. Kala xiriir Xafiiska Oregon ee Adeegyada Naafooyinka Koboceed 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.